

Waxa la samaynayo marka ceelkaaga daad soo galo

Haddii aad u malaynayso in ceelkaaga ay saameeyeen biyaha daadadku, EPA waxay ku talinaysaa tallaabooyinka u horeeya ee soo socda:


1. Ka fagow bamka ceelka biyaha “well pump” inta uu daadku ku jiro si aad iskaga ilaaliso koronto ku qabsata.
2. Ha cabin ama ha ku dhaqan ceelka daadku soo gaaray si aad iskaga ilaaliso in aad jirato.
3. Taageero ka hel qandaraaslaha ceelka ama bamka biyaha “pump” si loo sifeeyo isla markaana loo daaro bamka biyaha.
4. Ka dib marka bamka biyaha dib loo daaro, ceelka biyo ka soo saar ilaa biyaha soo baxayaa ka noqonayaan kuwo saafi ah si aad ceelka uga saarto biyaha daadka. Haddii biyaha soo baxayaa ay noqon waayaan kuwo saafi ah, biyahaaga tijaabo ku samee.



Karkari

Biyaha ka dhig in ay karkaraan ilaa 1 daqiiqo. U ogolow in ay qaboobaan, kuna keydi weelal nadiif ah oo dabool leh.


AMA



Kiimiko lagu daaweeyo

Waxaad gallon kasta oo biyaha ku dartaa 1/8 qaado (ama 8 dhibcood) oo ah, warankiilada/bilijita guriga taala ee, caadiga ah, aan urta lahayn, ee dareeraha ah, si fiican iskugu qas una ogolow in aad meel dhigto ilaa 30 daqiiqo ka hor inta aan la isticmaalin. Biyaha jeermiska laga dilay ku keydi weelal nadiif ah oo dabool leh.

IYO



Biyaha ha la tijaabiyo

Qof adeeg xirfadeed leh ha tijaabiyo biyaha si loo xaqiijiyo in biyuhu ku haboon yihiin in la cabo.

WAAXDA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA

Badbaadada Caafimaadka, U diyaargarowga iyo Jawaab bixinta

Telefoonka: 971-673-1315

Fax-ka: 971-673-1309

Adeegyada Biyaha la Cabo: healthoregon.org/dwp

OHA Facebook: www.facebook.com/OregonHealthAuthority

OHA Twitter: www.twitter.com/OHAOregon

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. La xiriir Badbaadada Caafimaadka, U diyaargarowga iyo Jawaab bixinta 971-673-1315 ama email-ka health_security@state.or.us. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.